

Dulmarka Adeeg Bixiyaha Cusub ee Nidaamka Xaadiritaanka

Gobalku maku siinayaa qarashka daryeelka ee aad siiso caruurta Ayadoo La adeesanaayo hanaanka Working Connections (Isku xirka Hawlaha) ama Seasonal Child Care (Daryeelka Caruurta ee Xiliga gaarka ah)?

Mataqaanaa?

- Waxaa lagaa doonayaa inaad lasocoto xaadirista adoo adeegsanaaya systemka xaadirinta oo elektarooniga ah.
- Markaad tahay adeeg bixiye cusub, waxaad haysataa 90 maalmood lagasoo bilaabo marka koobaad ee hanaanka lagu fasaxo inaad buuxiso shardigaan.
- Waxaad adeegsan kartaa systemka Department of Children, Youth & Families (DCYF, Waaxda Caruurta, Dhalinta iyo Qoysaska) si bilaash ah ama systemka qolada saddexaad oo aqoonsi kahaysata DCYF oo aad qarashka iskadhiihayso.

Sidee ayaad Arintaan Usamaysaa?

MID KADOORO NOOCYADA SOOSOCDA:

- Isticmaal systemka DCYF: Dhamayso **Tababarka** Systemka Xaadirista kadibna kuqor soo galista iyo bixitaanka systemka; **ama**
- Soo sheeg adeegsiga **systemka qolada saddexaad ee aqoonsiga kahaysata DCYF**.

KADIBNA:

- Qor xaadirista adoo usheegaaya inay qoysaskana usheegaaya inay caruurtooda kasoo galiyaan goobta daryeelka mid kamid ah dookhyada systemka xaadirinta elektarooniga ah.
- Si elektaroonig ah "ugudbi" diiwaanada xaadirinta adoo adeegsanaaya qalabka **KinderConnect**.

Haddii aadan buuxin shardigaan 90 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda lagu ogolaaday inaad hesho lacagta kaabista ah, mardanbana maheli doontid oggolaanshaha ah inaad daryeelka caruurta kubixiso Working Connections ama Seasonal Child Care. Haddii aad aaminsan tahay inaad xaq uleedahay **in lagaa dhaafo shardiga**, waad codsan kartaa.

Isticmaal systemka DCYF

Markaad isticmaalayso systemka DCYF, waxaad dooran kartaa sida qoysasku usoo galinayaan ugana bixinayaan xarunta daryeelka.

Waxaa Layga Doonayaa Inaan:	Inaan Adeegsado:	Tani waa:
Hayso oo soo gudbi diiwaanka xaadirinta adoo adeegsanaaya aaladaad rabto oo leh Internet (tusaale, laabtoob, taableet, taleefanka gacanta)	KinderConnect	Barta Internetka
Waxaan Ku qaadan karaa Diiwaanada Xaadirista:	Waxaan Adeegsan karaa:	Tani waa:
In waalidiinta loo sheego inay markay soo galayaan iyo markay kabaxayaan kuqoraan hanaanka ayagoo adeegsanaaya taableetka*	KinderSign	Tablet App (Alaada Taableetka)
In waalidiinta loo sheego inay markay soo galayaan iyo markay kabaxayaan kuqoraan hanaanka ayagoo adeegsanaaya taleefanka casriga ah	KinderSmart	Phone App (Alaada Taleefanka)
In waalidiinta loo sheego inay markay soo galayaan iyo markay kabaxayaan kuqoraan hanaanka ayagoo adeegsanaaya taleefan , ayna kujiraan kuwa landlineka ah	Jawaabta Codka Isdhexgalka Leh	Lambarka Taleefoonka
Baro sida aad urakibanayso dookha aad dooratay <u>Buuga Tasmada Hanaanka Xaadirista Elektarooniga ah</u>.		

*Taableetyada waa in laga gali karaa Google Play ama Apple App Store



Qaado Tababarka Systemka Xaadirista ee DCYF

- Tababarka si toos ah ayaa loo gali karaa, oonleen ahaan ama buuga ayaa boostada laguusoo diri karaa.
- Waxaad sidoo kale heli kartaa caawimaada qof iyo qof, oo layiraahdo Caawimaada Farsamada. Wixii Warbixin Dheeraad ah oo laxariira tababarka ama Caawimaada Farsamada, booqo **[Bogga Tababarka iyo Taageerada Hanaanka Xaadirista Elektarooniga ah.](#)**

Wixii Warbixin Dheeraad ah

Oo Kusaabsan Su'aalaha laxariira:	Booqo:	Wabseedka/Barta interneedka:
Bilaabida Shaqada	Bogga hore ee xaadirista elektarooniga ah	https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system
Tababarka iyo Caawimaada	Bogga Tababarka	https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training
Sida loo isticmaalo systemka DCYF	Buuga Istimaalaha Nidaamka Xaadiritaanka Elektarooniga ah ee DCYF	https://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/EASM_anual.pdf
Miyaan uqalmaa Kadhaafida Shardiga?	Kadhaafida xeerka: macluumaadka iyo codsiga	https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/exception
Nidaamyada Xaadirista kale ee aan Adeegsan karo	Nidaamka qolada saddexaad ee DCYF aqoonsiga kahaysta	https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/approved-systems

Ogolaanshaha kaalmaatiga la isiinaayo Waa Laxiray - Sidee ayaan Uheli karaa in Dib la iigu Furo?

Marka aad buuxiso shardiga adoo galinaaya xaadirinta soo galista iyo bixitaanka nidamka DCYF, ama soosheegaaya adeegsiga nidaamka aqoonsiga haysta ee qolada sadexaad, waxaad kala xariiri kartaa laynka adeeg bixiyaha oo ah 1-800-394-4571 si aad ucodsato in fasaxyada lacagta kaabista ah dib laguugu furo.

Waxaan Istimaalaa Nidaamka Qolada Saddexaad - Maxaan Sameeyaa hadda?

Qor dhamaan shaqooyinka xaadirinta adoo adeegsanaaya nidaamka ansixinta haysta una diyaar garoow inaad kajawaabto codsiyada lagaaga dalbanaayo diiwanada adoo bixinaaya koobiyada diiwaanada lagasoo qaaday systemka la aqoonsanyahay. DCYF ayaa adeegsanaysa nidaamka laxisaabtanka caadiga ah laga bilaabo 90 maalmood kadib marka ogolaanshaha lagu siiyo.

Yaan laxiriirayaa haddaan Su'aalo Qabo?

Haddii aad qabto su'aalo, waxaad laxariiri kartaa Kooxda Xaadirista Elektarooniga ah adoo kawacaaya 360-725-4658 ama **electronic.attendance@dcyf.wa.gov**.

Haddii aad horay u isticmaalaysay nidaamka DCYF aadna ubaahan tahay caawimaad, waxaad laxariiri kartaa Xafiiska Adeegyada Xaadirista Elektarooniga adoo kawacaaya 1-844-704-6777 ama **eas.servicedesk@dcyf.wa.gov**.

Taariikhdi Hore: Luuliyo 25, 2019

Uqalmida iyo Taageerooyinka Adeeg bixiyaha | Nidaamka Xaadiritaanka Elektarooniga ah